













# COVID-19: Aqoonsiga Calaamadaha

Calaamado		COVID-19	Durey	Hargab	Xasaasiyado*
		Calaamaduhu waxay u kala baxaan kuwo sahlan iyo kuwo ba'an	Tartiib u bilaabitaanka calaamadaha	Si kedis ah u bilaabitaanka calaamadaha	Laga yaabee kedis ama tartiib inay u bilawdaan calaamado
<b>Qandho</b>		Caadi	Dhif	Caadi	Maya
<b>Qufac</b>		Caadi	Caadi	Caadi	Neef
<b>Cune Xanuun</b>		Mar-mar	Caadi	Mar-mar	Mar-mar (Cuncun cunaha iyo dhabxanagga)
<b>Neef Qabatin</b>		Mar-mar	Maya	Maya	Caadi (neef)
<b>Daal</b>		Mar-mar	Mar-mar	Caadi	Mar-mar
<b>Burbur &amp; Xanuun</b>		Mar-mar	Maya	Caadi	Maya
<b>Madax-xanuun</b>		Mar-mar	Caadi	Caadi	Mar-mar
<b>San Da'aya ama Cabudhsan</b>		Mar-mar	Caadi	Mar-mar	Caadi
<b>Shuban</b>		Dhif	Maya	Mar-mar, gaar ahaan carruurta	Maya
<b>Hindhiso</b>		Maya	Caadi	Maya	Caadi

Waxaa laga soo qaatay waxyaabo ay soo saartay WHO; Xarunta Xakamaynta iyo Kahortagga Jirrada; iyo Akademiyada Ameerika ee Xasaasiyadda, Neefka iyo Difaaca Jirka. \* Xasaasiyado Qaab-neefsiga waxa ku jira xasaasiyadda rhinitis (qandhada hargabka), iyo xasaasiyadda neefka. Calaamadaha kale ee caadiga ah ee qandhada hargabka waxa ku jira cuncunka sanka iyo ka indhaha oo ilmeeya. Waa adag tahay sida loo kala garto calaamadaha COVID-19, ifilada iyo hargabka. Haddii aad qabto calaamadaha faafa ama neefsiga (sida cune xanuun, madax xanuun, qandho, neef qabatin, murqo xanuun, qufac ama sanka oo da'aya) ha tegin shaqada. Waxaad u baahan tahay in aad is-karantiinto oo uu ku eego xirfadyahan caafimaad. Waxa laga yaabaa inaad u baahato in lagaa baaro COVID-19. Waa in aanad shaqada ku noqon illaa inta uu xirfadyahan caafimaad kuu fasaxayo. Waa inaad hubisaa in dadka aad danaynaysa inay dhawrsoon yihiin oo yihiin ammaan. Dadka qaba calaamadaha xasaasiyadda neefsiga sida xasaasiyadda rhinitis (qandhada hargabka) iyo xasaasiyadda neefka waa inay guriga joogaan oo laga tijaabiyaa COVID-19 bilowga calaamadahooda oo haddii ay isku arkaan calaamado aan la filayn, ka duwan ama ka ba'an kuwii caadiga ahaa, ama aanay raadcelin daawaynta caadiga ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee la xiriiira **Coronavirus (COVID-19)** aad [health.gov.au](https://www.health.gov.au) Booqo [www.health.gov.au/resources/translated](https://www.health.gov.au/resources/translated) ama adeegyada tarjumadda iyo afcelinta wac **131 450**.